Guddiga Xuquuqda Aadamiga ee Kintaaki waa Hay'ad ay abuurtey Dawlad Goboleedka Kintaaki si ay u xaqiijiso sinnaanta dadka oo dhan. Ujeeddadeena aasaasiga waa ka hortagga midab kalasooca inagoo hirgelinaynaa, korna u qaadeynaa Sharciga Kintaaki iyo Shuruucda Dawladda Dhexe ee ku saabsan Xuquuqda Dadweynaha.

# Anaga wax nagu Saabsan

Waxaan ku faraxsanahay guulaha aan ka gaarney xuquuqda aadamiga, kuwaas oo sii socdeen ilaa nus qarniga dambe. Xarunteena waa Luwisfiil iyo xafiis kale aan ku qabno Waqooyiga Kintaaki ee Magaalada Kofington, Guddiga Xuquuqda Aadamiga wuxuu albaabooyin fursadeed u furey kumaankun qofood ah.

Gobolka Kintaaki wuxuu qabaa guddiga xuquuqda aadamiga ugu fil weyn dhanka konfureed ee xarriiqa Meesan-Diksan. Golaha Guud ee Kintaaki wuxuu abuurey Guddiga Kintaaki ee Xuquuqda Aadamiga sanadka markuu ahaa 1960. Doorka hay'adda waa dhiiri gelinta ula macaamilka dadka si xaq ah, horumarinta is afgarashada iyo xushmadda, iyo kahortagga midab kala sooca lagula dhaqmo qolo kasto ama koox jinsi kale ama xubnahiisa.

Sanadka markuu ahaa 1966, doorkeena wuxuu ku fidey markii lasoo soo saarey Sharciga Xuquuqda Dadweynaha Kintaaki(Xeerka Dib loo qorey ee Kintaaki Cutubka 344). Sharcigan wuxuu ka dhigey midab kala sooca sharci darro, wuxuuna siiyey Guddiga Kintaaki ee Xuquuqda Aadamiga Awoodda Qaanuuneed in ay ku fuliso sharciyada xuquuqda dadweynaha ee barwaaqo sooranka. Sharciga wuxuu kaloo ka dhigey Kintaaki dawlad goloboleedka ugu horeeya ee koonfurta oo xaaraantinimeeysa midab kala sooca. Xubnaha Guddigeena waxay go'aan ka gaaraan cabashada midab kala sooca iyagoo isticmaalaayaan awoodda qaanuunka maxkamadeed.



Guddiga wuxuu helaa, kana bilaaba baaris, hisihiis siin wuxuuna tallaabo ka qaadaan cabashooyinka la xiriira ku xad gudubka Sharciga Xuquuqda Dadweynaha ee Kintaaki. Guddiga Xuquuqda Aaadamiga ee Kintaaki waxaa kaloo uu awood ka qabaa Qaybta Guryeenta iyo Horumarinta Magaalooyinka Mareykanka iyo Guddiga usinnaanta Fursadaha Shaqaaleynta ee Mareykanka in ay hirgeliyaan fulinta qawaaniinta xuquuqda dadweynaha ee Dawladda dhexe.

Guddiga wuxuu ku qasbanyahay in uu baro dadweynaha arimaha ku saabsan qawaaniinta lidka ku ah midab kala sooca iyo faa'iidada sinnaanta. Waxaanu bixinaa barnaamij tacliineed oo iskujira, tababar, cilmi baaris, Gaarsiinta dadka iyo iskaashi iyadoo si xooggan ah aan fulino waajibaadkan.

# Sharciga Xuquuqda Dadweynaha ee Kintaaki

## Kuwa soo socda waa dabaqadaha uu sharciga ilaaliyo:



Da'da, Midabka, Itaal la'aanta, Xaaladda Qoyska, Dalka asaka Qofka ka yimid, Qolo, Diin, Jinsi, iyo Cabidda Sigaarka iyo Xaaladda Cabid La'aanta Sigaarka.



Qof walboo waxaa laga ilaalinooya midab kalasooca dhanka Guryeenta, shaqaaleynta, Deegaanada caamka, iyo Macaamilka Maaliyadeed.

## Waa maxay midab kala sooca?

Midab kalasooca waxaa lagu macneeyey Sharciga Xuquuqda Aadamiga ee Kintaaki falis ficil walboo si toos ah ama si aan toos ahayn ka bixiyaa, ka sooca, xannibaad, midab Kalasooc, xad u-yeelis, diidmo, inkiraad, ama fal kale ah ama kala bixinta, doorsasho, xagga la dhaqanka qofka ama dadka, ama kaalmeynta, khalad ku gar-gaarin, kicin, hanjabid, qasbin intaas waa sharci darro marka loo raaco sharcigan.

# Dhawritaan Sharciyadeed

## Guriyeenta

Lid ayey ku tahay sharciga in qofka midabkiisa wax looga sooco marka uu raadiyo kireynta ama lahaanshaha guriga. Waxaad xaq u leedahay in lagula macaamiltamo si xaq ah iyadoo aan la fiirsan midabkaaga, itaal-la'aanta, xaaladda qoyseed(haddii aad la nooshahay carruur ka da' yar 18 jir) , waddanka asalka aad ka timid, qolo, diin ama jinsi.

**Micnaha Sharciga Guryeenta Xaq-ah ee Kintaaki**

Maraykanka iyo Sharciyada guryeenta xaq-ah ee Kintaaki wuxuu siiya fursad loo simanyahay dadka oo dhan markii ay iibsadaan, sii gadaan, kireystaan, maalgeliyaan ama caymiyaan guryaha. Waxaad xaq u leedahay in aad gadato ama kireyso meesha aad guriga ka doorato, guryaha koondaminiyam, abaartamento, tareeylar, ama dhul. Qof walbo waa inuu u hoggaansanaada sharciga, iyadoo ay ku jiraan milkiilayaasha guryaha, maamulayaasha guryaha, dalaaleyda guryaha, wakiilada gadista, kuwa hawsha socodsiiya, Kuwa dhisa iyo kuwa maalgeliya, kuwa xayeysiiska sameeya iyo qalabka warbaahiyaha, kuwa deemada bixiya, kuwa caymiya, iyo bangiyada ama hay'adaha maaliyadeed. Haddii aad u baahantahay faah-faahin, weydiiso Buugga yar ee Guddiga Xuquuqda Aadamiga ee Guriyeenta Xaq-ah ee Kintaaki ama soo booqo shabaqada interneetka ah www.kchr.ky.gov. Sidoo kale soo booqo hay'adda Horumarinta Guryeenta iyo Magaalooyinka Dalka ee Guryeenta Xaq-ah bartooda Shabaqada Interneetka oo ah www.hud.gov/offices/fheo.

## Shaqaaleynta

Waa sharci darro in dadka la kala sooco dhinaca shaqaaleynta. Arintaan waa run iyadoo aan la fiirinin da'da qofka(40 iyo waxii ka sareeya), midabka, itaal la'aanta, asalka dalka qofka, qolo, diin, jinsi ama xaaladda cabitaanka sigaarka. Waa sharci darro in qofna laga takooro marka ay noqoto xagga shaqo qorista, shaqo siin iyo dalacsiin, beddelid, U xilsaarid shaqo, cabbirid fulin hawleed, deegaanka shaqada, tababar siin shaqo, edbin iyo ka-sii deyn, Mushaharka iyo faa'iidada(xuquuqda), ama shuruud kale, shardi, ama mudnaanta shaqaaleynta. Sharciga ma xaarantinimeeyso midabtakoorka bareerka ah keliye, laakiin sidoo kale siyaasadaha dhexdhexaadka ah ee shaqada kuwaas oo si aan le'ekeyn saameeya dad ka tirsan dabaqad ka mid ah kuwa la dhawro kaasna aan la xiriirin shaqada iyo baahida ganacsiga. Sharciga waxaa lagu dabaqaa kuwa shaqaaleeya siddeed qofood ama in ka badan(15 ku jira andacooddida itaal la'aanta), xagga ganacsiga, hay'adaha shaqaaleynta, ururada shaqaalaha, hay'adaha shati bixinta, hay'adaha dawladda dhexe, iyo Barwaaqa Sooranka Kintaaki iyo qaybaha siyaasadeed ee hoose, ayna ka mid yihiin dugsiyada caamka .Haddii aad u baahantahay faahfaahin, soo weydii Buugga yar oo ku saabsan Shaqaaleynta ee Guddiga Xuquuqda Aadamiga ah ee Kintaaki ama soo booqo barta shabaqada interneetka www.kchr.ky.gov. sidoo kale, soo booqo barta shabaqada interneetka Guddiga dalka ee U- sinnaanta fursadaha shaqaaleynta oo ah www.eeoc.gov.

## Deegaanada Caamka ah

Waa sharci darro in meelaha deegaanada caamka ah, sida goobaha dalxiiska ama maaweelada loo diido ama looga joojiyo isticmaalka buuxa ee alaabta yaala, qalabka iyo deegaanka qof walbo midabkiisa/midabkeeda, itaal la'aanta, dalka asalka uu qofka ka yimid, qolada uu ku abtirsado, ama diin darteed. Meelaha deegaanada caamka waxaa ka mid ah, dukaamada, ama goobaha kale ee ganacsiga, ha ahaadaan meelo shati leh ama aan lahayn, oo siiya alaabo ama adeegyo dadweynaha caamka ah ama kuwo codsada ama aqbala sadaqo ama ganacsi guud ee caam ah kaasoo si toos ah ama aan si toos ahayn lagu kaalmeeyo deeq dawladeed. Dukaamada, Maqaayadaha, goobaha ganacsiga, tiyaatarada, hoteelada, iyo xafiisyada daaweynta la xariira waa tusaalooyin yar ka mid ah. Intaas waxaa u dheer maqaayadaha, hoteelada, moteelada, iyo meelaha wax fududeeya oo si toos ah ama aan si toos ahayn kaalmo ka helaan deeqda dawladda waa ka reebanyihiin in ay ka diidaan isticmaalka qalabka ama adeegyada jinsiga darted.

## Guddiga Kintaaki ee Xuquuqda Aadamiga

332 W. Broadway, Suite 700
Louisville, Kentucky 40202
(502)595-4024    1(800)292-5566
TDD: (502)595-4084
Email: kchr.mail@ky.gov
www.kchr.ky.gov

Nasoo Wac haddii aad u baahantahay kaalmo ama aad jeceshahay macluumaad dheeraad ah. Ama nala soo xiriir adiga oo boosta kusoo dirtaa kaarka codsiga macluumaadka ee hoos ku qoran.

___Aniga waxaan la kulmey midab Kalasooc. Ilasoo xiriira si aan dacwo u gudbiyo.

___Igu dara liiska warsidaha e-meeylka

___Igu dara liiska guddiga munaaqashaadka/wada hadalka ka qayb gala, Hoolka Dadka Caanka ah ee Xuquuqda Dadweynaha Kintaaki iyo dhacdooyin kale oo gaar ah.

___Wax Kale______________

Magac______________
Cinwaan______________
Telefoon______________
E-mail______________

## Macaamilka Maaliyadeed

Diidmada daynta ama maal gelinta ee hay'adaha maaliyadeed ama qof bixiya dayn laakiin lagu saleeye midab, itaal la'aanta, dalka asalka qofka, qolada uu ka dhashay, diin ama jinsi waa sharci darro. Waana sharci darro in qofka laga takooro asbaabaha xagga sicirka dulsaarka, ama lacagta bil walboo daynta lagu bixiyo, xagga shuruudda iyo jadwalka lacag bixinta, dhibicyada, lacagta laga bixiyo adeeg, ama ganaax, ama fidinta Caymiska lacagta daynta.

## Aar-gudasho

Waa sharci darro in uu qofka aar-goosto ama takooro si walbo ah qof diidey in uu sameeyo wax aan sharci ahayn sida ku cad Sharciga Xuquuqda Dadweynaha ee Kintaaki ama uu isaga/iyada soo gudbiye cabasho ama kaalmeeye baaritaan ama dacwo si kasto ha ahaate oo waafaqsan Sharciga Xuquuqda Dadweynaha ee Kintaaki.

## Sida loo Gudbiyo Dacwo

Waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Xuquuqda Aadamiga ee Kintaaki in ay ashtako midab kalasooc ah telefoon ku sameeyaan, si shakhsi ah, ama faks ama e-mail. Xasuuso haddii aad rabto in aad gudbiso dacwo ku saabsan midab kalasooca guryeenta, waa in aad nala xiriirta muddo sanad gudaheed ee arintaas dhacay. Haddi ay ku saabsantahay dacwo midab kalasooc xagga shaqaaleynta ah ama deegaanada caamka ah ku saabsan, waa in aad nala xiriirta muddo 180 maalmood ee arintaas dhacay.

Markii aad nala xiriirto ka bacdi, wakiilkeena ayaa ku wareeysan doona si uu kaa helo faahfaahinta waxii dhacay. Mar haddii la go'aamiyo in Guddiga Kintaaki ee Xuquuqda Aadamiga ay qabaan awoodda wax xukumida in ay dacwada qaataan iyo wal-walkaaga uu yahay mid buuxisa shuruudaha dacweynta, kiiskaaga waxaa loo xilsaaraaya sarkaalka ku shaqa leh fulinta sharciga

Sarkaalka ku shaqa leh fulinta sharciga wuxuu si aan eexasho lahayn baari doona xaaladda dacwada. Sidoo kale Sarkaalka sharci fulinta wuxuu la shaqeeyn doona adiga/idinka iyo qolada la dacweeye si maslax ahaan kiiska looga gaaro xal raalli-gelin leh, haddii ay suurtoowdo maslaxada wuxuu la mid yahay heshiiska arinta lagu dhameeyo. Haddii kale, markii uu dhammaado baaritaanka, iyo haddii la helo sababta dacwo oogashada, kiiska wuxuu u gudbaa .Marxaladda dacwo qaadashada waxaana gacanta ku hayn doona qareenka guddiga. Xubnaha Guddiga waxay gaari doonaan go'aano kama dambeys ah, waxayna soo Saaraan xukunka. Guddiga wuxuu ku dhaqaaqa fulinta sharciga iyagoo isticmaalaayaan awoodda sharciga maxkamadda.Hab kale oo baddeli kara mariinkaas dacwadeed waa ka qayb galka barnaamijkeena dhex-dhexaadinta. Dhex-dhexaadinta waa hab kale , oo loo maro si ikhyaar ah oo aan rasmi ahayn kaasoo bixiyaa gole laga wada hadlo dacwada ka dhaxeeya adiga, dadka dhinaca kale kasoo jeedaan iyo dhexdhexaadiye aan meelna raacsanayn, iyadoo ujeeddada tahay in si deg-deg ah la xalliyo dacwada lasoo sheegay.

## Waxbarasho iyo Tababar la Heli karo

Waxaynu bixinaa barnaamijyo tacliineed oo kala duwan oo dadweynaha loogu talagaley.
Soo booqo barteena shabaqada interneetka ama buuxi kadibna noo soo celi kaarka codsiga faahfaahinta macluumaadka oo halkan ku liifaan. Waxaynu siina tababaro ku saabsan u hoggaansashada xuquuqda dadweynaha milkiilayaasha iyo shaqaalaha deegaanada caamka ah, mas'uuliyiinta dawladda hoose iyo saraakiisha booliska, tababaro ku saabsan guriyeenta xaq-ah ayaan siina dallaalka guryaha, dadka guryaha iska leh iyo maamulayaashood, tababaro ku saabsan u hoggaansashada fursadaha loo simanyahay ayaan siina kuwa dadka shaqa siiya, maareeyayaasha iyo shaqaalaha, iyo waxaan shaqaalaha siina tababaro ku saabsan taabasho ama hadal galmo la xiriira. Waxaan bixinaa kaalmo ku saabsan isutega urur ahaan, tababar, iskaashi iyo gacan siin guddiyo badan oo halkan ka shaqeeya xuquuqda aadamiga gobolka Kintaaki oo dhan kuwaas oo ka shaqeeya horumarinta sinnaanta iyo kala duwanaanshaha. Haddii aad jeceshahay in aad naga caawiso abaabulidda guddiga xuquuqda aadamiga aagiina, nala soo xiriir.

Guddiga Kintaaki ee Xuquuqda Aadamiga
Waxii ku saabsan Buugga yar ee Guddiga 2/09

Hawsha salka ku ahaa soo saarista daabacaddaan waxaa suurta gal ka dhigay kaalmada deeqda Qaybta Guryeenta iyo Horumarinta Magaalooyinka . Nuxurka iyo waxyaabha kasoo baxey shaqada waxaa loogu tala galey dadweynaha. Qofka qoraha iyo kuwa daabaca waxay mas'uul ka yihiin sax ahaanshaha waxyaabaha qoran iyo tarjumadooda ay ku jiraan daabacadan. Fasiraadan ma aha mid ka hadleysaa aragtida Dawladda Dhexe.

## Sinnanta Waa Xaqaagi



**Furista Alabaabada Fursadaha**

*wixii ku saabsan*

# Guddiga Kintaaki ee Xuquuqda Aadamiga

ILAALIYAHA XUQUUQDA DADWEYNAHA
CODKA SINNAANTA
DHIIRI GELIYAHA ISBEDDELKA XAQIIQDA AH

Somali Translation